SOMALISKA

# Warbixin ku saabsan NOVA T380

Cu380Ag

## Waa maxay NovaT?

NovaT waa  gariirad naxaas ah (wax la geliyo makaanka) oo laga sameeyey caag u ḋican unugyada jidhka (polyetylen) iyo xasow naxaas ah oo dhex-deedu tahay qalin (totalyta 389 mm). Halka ugu hoosaysa gariiradda waxa ku yaal xasow lagu soo qabto/lagu kontoroolo. NovaT waxay ka mid yahay noocyada cusub ee gariiradaha naxaasta ah ee ay ku badantahay naxaastu bedkooda, taasoo si hubaal ah uga hortegaysa uuraysiga aan la rabin.

## Sideebay u shaqaysaa NovaT?

Gariiraddu  waxay asal ahaan u falgashaa si ay u hakiso uuraysi. NovaT waxay wax ka bedeshaa manida, ukunta dumarka iyo maritaankeeda sid-deyaasha minka. NovaT waxa loogu talo galay in la isticmaalo shan sano.

## Sidey hubaal u tahay NovaT?

NovaT waxay ka mid tahay noocyada cusub ee gariiradaha naxaasta ah ee ay bedkooda ku badantahay naxaastu, waana noocyada ugu hubaalsan qa-labka jira ee ka hortagga uuraysiga. Cilmi-baadhis ballaaran oo lagu sameey-ey NovaT, waxay muujisay in ay halista uuraysigu  sanadkii ka yartahay hal keli ah labadii boqolba (1/200), taasoo u dhiganta xagga hubaal ahaanta; kiniinka dhasha la iskaga joojiyo ee la xoojiyey. Gariiraddu waxay marka la xirtaba si firfcooni leh u keenaysaa uuraysi-joojin toos ah, marka la iska furana waa la uuraysan karaa. NovaT kaama difaacayso cudurada lagu kala qaado galma-da, markaa waxa haboon in aad isticmaasho kondhom haddii aad isla seexa-naysaan qof cusub. Haddii adiga oo xidhan gariirad aad uuraysato isla mar-kaana aad rabto in aad sii wadato uurkaas, waa in gariiradda la soo bixiyo.

## Yaa isticmaali kara NovaT?

NovaT waa qalab uur-joojineed oo la hubo lagulana talinayo dumarka ba-dankooda. Maadaama aanay ku jirin NovaT wax hormoonno ahi, waxay noqonaysaa mid u ḋican dadka aan isticmaali karin amaba aan rabin in ay isticmaalaan waxyaalaha ka samaysan hormoonnada.

## Yaan isticmaali karin NovaT?

Xaaladaha qaarkood lama isticmaalayo gariiradda naxaasta ah:

- Marka uu uur jiro ama laga shakisanyahay.
- Marka laga cabsiqabo amaba uu jiro xanuun xagga macdanta.
- xanuunka makaanka ee umulidda ama ilma iska soo xaaqidda ka dib   mud do saddex bilood gudahood ah.
- Dhiig ka yimaadda siilka oo aan la garanayn sababtiisa.

Dhiig-caado oo farabadan, birta oo yaraata ama ka soo baxyo muruqya-da ma-kaanka ahi (myom) waxay noqon karaan sababo ay haboontahay in aan loo is-ticmaalin gariiradda naxaasta ka samaysan.

## Goorma ayaa la xidhanayaa?

Waxa kugu xidhaya umuliso ama dhakhtar. Taa waxa la samayn karaa mar alla markii la doono waxaase sharci ahaan la sameeya wiiga caadada ku xiga, si loo hubsado in aan uur jirin. Isku xidhiddu sida caadiga ah waa wax fudud oo aan xanuun lahayn laakiin dumarka qaar ayaa dareema xanuun iyo dawakhaad. Haddii xanuunkaas iyo dawakhaaddaasi ay baabi´i waayaan nusasaac gudahood, waa in dib loo eego in gariiraddu si sax ah u fadhido. Marka laguu xidho gariiradda waxa la jarayaa xasowda lagu soo qabto/ lagu kontoroolo si mararka dambe loo kontorooli karo in gariiraddu ku fadhi-do meeshii loogu talogalay. Xasowdaas waxa gudaha shishe ee siilka oo ah makaanka afkiisa lagaga taaban karaa farta. Waa muhiim in la kontoroolo xasowda, tusaale ahaan caado kasta ka dib. Xasowda qariiraduhu marka la isu galmoonayo, kuma keenaan rag iyo dumar toona  wax dhibaato ah. Ma dhacdo in gariiradda la cadaadiyo, haddiiba se laga shakiyo waa in lala xidhiidho umulisada ama dhakhtarka. Maalmaha ugu horreeya marka la is geliyo ka dib, waxa habboon in aan la dabbaalan ee caadi loo maydho.

## Xanuunadee ayaan ka qaadi karaa isticmaalka gariiradda?

Mararka qaarkood oo ah wiigagga ugu horreeya marka la xidho ka dib, waxa dhici karta in la dareemo xanuun shabbaha ka caadada oo kale, iyo dhiigid yar. Sida caadiga ah taasi waa wakhti kooban. Haddii dhibaatadu sii socoto amaba sii korodho, la xiriir umuliso ama dhakhtarka dumarka.

Marka la xidho gariiradda waxa iman kara caabuq gala macdanta. Laakiin wakhtiyar ka dib halistaasi waa yaraanaysaa.

Xiitaa dhiigga caadadu waa badan karaa marka aad isticmaalayso gariirad.

## Caado-dhowr yadee ayaan isticmaali karaa?

Isla marka aad xidhato ka dib, ma haboona in aad xidhato caado-dhowr. Laakiin wakhti yar ka dib waad isticmaali kartaa caado-dhowre, sida caa-diga ahba. Marka aad iska beddelayso caado-dhowre waa in aad hubsa-to si aanu u qabsan xasowda lagu soo qabto gariiradda. Iska jir in aad is-ticmaasho caado-dhowre haddii aanad caado lahayn.

## Haddii aan rabo in aan uuraysto?

La xidiidh umulisadaada ama dhakhtarka dumarka marka aad rabto in la-gaa bixiyo gariiradda.


Fursadihii aad ku uuraysan karaysay waxay kuu soo laabanayaan isla marka lagaa bixiyo NovaT.

## Goorma ayaan la xiriiraa umuliso/dhakhtar?

Kontoroollo soo noqnoqda ayaa lagugula talinayaa adiga oo kala xaajoo-naya umulisadaada ama dhakhtarka. Dhakhso ula xiriir umulisadaada/ dhakhtarkaaga haddii aad calaamadahan mid ka mid ah isku aragto:

- Moxog-xanuun kabuubyo u eeg iyo miyir doorsoon soo booda
- Haddii aad isaga shakido caabaq. Calaamaddu waxay noqon kartaa kaar, xumad iyo dhiig saa´d ah
- Haddii xaydkii kaa habsaamo oo aad ka shakido uur
- Gariiradda oo qayb ahaan ama gebi ahaanba soo baxda, ama haddii aad gaadhi waydo xasowda lagu soo qabto/ lagu kontoroolo. Haddii dhiig badan kaa yimaaddo ama isbedel weyni ku yimaaddo xaydka. Waxaadse xasuusnaataa in dhiig badan oo xaydka ah iska caadi yahay marka la xidho gariiradda naxaasta ah.

*Wixii warbixin ah ee dheeraad ah, kuna saabsan gariiradda naxaasta ah iyo NovaT, waydii umulisadaada ama dhakhtarkaaga. Waxad kaloo fiiisaa warqadda la socota kartoonka.*




Nova-T 380,  ilmo-galeenka la galiyo, 380 mm2 silig naxaas ah

**Tilmaamaha**: Kahortagga uurka. **Waxyeelooyinka ay keento:** Xanuun la mid ah ka caadada iyo dhiig yar oo kaa yimaada ayaa iman karra  dhowrka todobaad ee ugu horeeya. Dhiiga caadad oo aad u badan. **Calaamada**: Uurka la og yahay ama laga shakisan yahay ee jira, khatar sare ama infekshanka hoosta oo jira, infekshinka ilmo galeenka saddex bilood ka dib dhalmada ama ilmo iska soo rididda, dhiig ka yimaada siilka oo aan laga warqabin sababta. Caadada weyn, xadiidka oo kaa yar ama finan (myoma) ilma-galeenka ku yaala ayaa sabab u noqon kara in aan siliga naxaasta aanay aheyn in la isticmaalo. Hubinta macluumaadka 2020-01-09

PP-NOV-SE-0008-2 MAJ 2022